


DAKHLIGA

1. Dib-u-milicsiga Dakhli-ururinta Gudaha ee 2020

Guud ahaan sannadkii 2020, waxa dawladdu ururisay dakhli dhan SI.shs 2.010 *Tirilyan* (oo aanay ku jirin mashaariicda Bangiga Adduunku) oo u dhiganta US\$ 287 Milyan. Ilaha dakhli-ururinta 2020 u mudan waxa ka mid ahaa cashuuraha wax-soo-dejinta iyo iibka oo 54% ka noqday dakhliga guud. In kasta oo adduunkuba la ciircirayey safmarka Covid-19, haddana dakhli ururinta waxa ay 12.4% - oo u dhiganta SI.shs 221.5 Bilyan - ka sarraysey u dhigankeedii sannadkii ka horreeyey 2019, taas oo loo sibir-saarayo cashuuraha soodejinta oo laxaadaystay (iyada oo la ururiyey SI.shs 86 Bilyan dheeri ka ah middii sannadkii ka horreeyey), cashuuraha dakhliga ganacsiga oo isaguna kor u kacay 190% (oo u dhiganta SI.shs 24 Bilyan).

Bille marka loo eego, waxa aad u hooseeyey sannadka qaybtiisii hore oo aan ka duwaneyn sida uu ahaan jirey sannadihii ka horreeyey hase yeeshee ay u dheerayd dhaqaalaha adduunka oo hoos u hoobtay safmarka Covid-19 iyo xayiraadaha uu la yimi awgood. Sideeda kale, dakhli-ururinta kama tagganayn saanqaadkii sannadihii ka horreeyey iyada oo waxqabadka kastamada iyo cashuuraha berrigu xoog u xoogeysteen rubuc-afraadkii/3 billodkii u danbeeyey sannadka 2020-ka. Marka la eego sida loo gaadhey yoolalkii dakhliga, waxa sannadka 2020 ka hoos maray bartilmaameedkii 1.5%. Dakhli-ururinta cashuuraha berrigu waxa ay 10% ka kor mareen yoolkii, halka kastamadu 5% ka waabsanaayeen bartilmaameedka taas oo loo aaneeyey xannibaadaha ganacsi ee uu waajibiyey la-tacaalidda safmarku.

Jaantuska 1aad: Waxa uu ka Kala Koobnaa Dakhliga 2020 oo u qaybsan Madaxyada Cashuuraha



2. Miisaaniyadda 2021—Odooroska Dakhliga Gudaha


2.1. Odooroska Dakhliga Gudaha ee 2021 oo la Barbardhigay Ururinta Dhabta ah ee 2020

Khayraadka dakhli ee la odorosay inay soo hoyato sannadka 2021-ka waa SI.sh 2.101 Tirilyan, oo ka dhigan korodhsiimo ah 2.7% tii sannadkii 2020-ka la odorosay iyo 4.5% inay ka badan tahay dakhligii dhab ahaan la ururiyey 2020-ka.

Shax 5 waxa ay muujineysaa waxyaabaha uu ka kooban yahay odooroska dakhli-ururinta 2021-ka iyo dhab ahaan sida uu noqday sannadkii ka horreeyey ee 2020-ka. Sida muuqata, cashuuraha ganacsiga caalamiga ah ayaa ka noqonaya 50.4% odooroska dakhliga 2021, kaas oo in yar uun ka sarreeya kii dhab ahaan la qabtay 2020 oo dhamma 47.9%. Madaxa labaad ee dakhli-ururinta u sarreeyaa waa cashuuraha agabka iyo adeegyada oo 2020-ka ka ahaa ururinta dakhliga 31.9% hase yeeshee la filayo in uu 2021-ka

noqdo 32.5%. Qaybaha ururinta dakhliga ee hadhay waa cashuuraha dakhliga ama faa’iidada macaashka, *cashuuraha kale iyo wixii kale ee dakhli ee soo raaca.*

Jaantuska 2aad: Odoroska Dakhliga 2021-ka (Midig) oo la Barbar Dhigay Ururinta Dhabta ah ee 2020-ka (Bidix), Boqolleyda % wadarta



2.2. Odoroska Dakhli ee Kastamada & Cashuuraha Berriga ee 2021-ka oo la Barbar Dhigay Dakhli-Ururita Dhabta ah ee 2020-ka

Sida ka muuqata *Shax 6* ee xagga hoose, dakhli-ururinta dawladda inteeda badan waxa sameeya kastamada iyo cashuuraha berriga. Waaxda Kastamada ayaa iyadu ah cashuur-ururiyaha u weyn iyada ay 75% wadarta guud ee dakhli-ururinta 2020-ka iyadu soo hoysey. Lama filayo in wax iska bedelaan cududaa sannadka 2021-ka, iyada oo laga filayo in kastamadu soo xereeyaan 78% wadarta guud ee dakhliga. Cashuuraha Berriga waxa ay dakhli-ururinta 2020 ka ahaayeen 19%, halka laga filayo inay ka noqdaan 18%

sannadka 2021-ka. Hay'adaha kale ee dawladda ee leh waajibaad dakhli-ururineed, waxa ay ku biiriyeen dakhliga 2020-ka 6%, halka laga filayo inay 4% ku soo kordhiyaan sannadka 2021-ka.

Jaantuska 3aad: Odoroska Dakhliga 2021-ka oo la Barbar Dhigay kii Dhabta ahaa ee 2020-ka iyo Hay'adda ka Masuulka ka ahayd oo ah SI.shs Bilyan

